Ku dhaqan Xafiis D.

# Faafinta Rasmiga ah
# الجريدة الرسمية
# Official Bulletin
## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 10aad** **Muqdisho, 31 Maarso 2023** **Lr. 1**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**FAAFIN BILAHA SOO BAXAY**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

W.M

## BOGGA LABAAD

XEER

## BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

# BILAHA

# JANUARY, FEBRUARY, MAARSO

# 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**SHARCI LR.006** **Taariikh: 20 Maarso 202**

**OGOLAANSHO ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA SOCDAALKA SOOMAALIYA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka **XGGSH/0250/B11/23**, ku taariikheysan **19/03/2023**, kuna saabsan **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Socdaalka Soomaaliya.**

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Socdaalka Soomaaliya.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-034-23
TAARIIKH: 26/3/2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Madaxweynaha J. F.S**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

# JUMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# HINDISE SHARCIYEEDKA SOCDAALKA SOOMAALIYA

## CUTUBKA 1AAD:
## QODOBBO GUUD IYO KAALINTA HAY'ADDA SOCDAALKA IYO JINSIYADDA

### Qodobka 1aad:
### Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa Sharciga Socdaalka Soomaaliya (Somali Immigration Law).

### Qodobka 2aad:
### Ujeeddada Sharciga

Sharcigan waxaa lagu nidaaminayaa hab-raacyada khuseeya socdaalka Soomaaliyeed sida soo gelidda, maridda (Transit) ka bixidda, joogista iyo degista Dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS)

### Qodobka 3aad:
### Erey-bixin

Haddii aan Sharcigan dhexdiisa si kale loogu sheegin, ereyadan soo socda waxaa midkasta lagu qeexayaa micnaha ku hor qoran;

1) **Wasiir:** Waxa loola jeeda Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda JFS.
2) **Wasaarad:** Waxa loola Jeeda Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda JFS.
3) **Muwaadin:** waxaa loola jeedaa qof kasta oo Soomaali ah, si waafaqsan Qodobbada Dastuurka JFS iyo Sharciyada kale ee lagu caddeeyo muwaadinnimada iyo jinsiyadda Soomaaliya;
4) **Ajnabi:** waxaa loola jeedaa qof aan muwaadin Soomaali ahayn;
5) **Ajnabi aan raalli laga ahayn:** waxaa loola jeedaa qofka ay tilmaamayaan Qodobbada 38aad & 39aad ee Sharcigan;
6) **XJFS:** waxaa loola jeedaa Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
7) **JFS:** waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
8) **HSJS:** waxaa loola jeedaa Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed;
9) Hay'adda: waxaa loola jeedaa Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed oo heer Federaal ah;
10) **Qaxooti:** waxaa loola jeedaa qof kasta oo ay qaxootinnimo u qeexayayaan Sharciyada dalka iyo Axdiga Caalamiga ah ee Jineefa ee 1951 (Geneva Convention 1951) ee la xariirta xaaladaha qaxootiga;
11) **Agaasime Guud:** waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed;
12) **Sarkaal Socdaal:** waxaa loola jeedaa qof kasta oo ah hawl-wadeen ka tirsan Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda si waafaqsan Sharciagan;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA · THE UPPER HOUSE · AQALKA SARE
JAMHUURIYADDA FEDERALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA · THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC · HOUSE OF THE PEOPLE · GOLAHA SHACABKA

13) **Baasaboor:** waxaa loo la jeedaa dukumenti socdaal oo rasmi ah oo uu si sharci ah dal u sameeyo, dalna looga baxo, dal kalena lagu galo, lana aqoonsan yahay oo oggolaansho la saari karo;

14) **Uqaybsane**: waxaa loo la jeedaa sarkaal ka socda Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda ay u idmatay in uu ka hawl-galo safaarad ama qunsuliyad dalka dibeddiisa ah oo ay leedahay JFS;

15) **Amar Masaafurin:** waxaa loola jeedaa amar lagu soo saaro in qof uu ka baxo dalka JFS;

16) **Bar-xudduudeed:** waxaa loola jeedaa goob kasta oo loo asteeyey in si sharci ah laga soo galo dalka, loogana baxo, isla markaana uu ka furan yahay Xafiis Socdaal (Immigration Office) sida; dhulka, cirka iyo badda, halkaas oo suurto-gelinaysa in laga helo dhammaan adeegyada lama-huraanka u ah Socdaalka;

17) **Dal-ku-gal: (Entry Visa):** waxaa loola jeedaa oggolaansho dal-ku-gal sharci ah oo la siiyo qof ajanabi ah ama wata Baasaboor ajanabi ah;

18) **Dal-ku-joog**: waxaa loola jeeda oggolaansho dal-ku-joog sharci ah oo la siiyo qof ajanabi ah oo gudaha dalka joogaya, marka laga reebo muwaadin Soomaali ah oo wata Baasaboor ajnabi ah;

19) **Degganaansho:** waxaa loola jeedaa oggolaansho deegaan rasmi ah oo la siiyo qof ajanabi ah oo si rasmi ah dalka u deggan.

20) **Buug Bad-maax:** waxaa loola jeedaa dukumenti aqoonsi oo ay isticmaalaan bad-maaxiinta oo aduunka laga aqoonsan yahay;

21) **Baasaboor Dawlad**: waxaa loola jeedaa baasaboorka Shaqaalaha Dowladda (service passport) iyo midka Diblomaasiga ah oo labaduba loo bixiyo Safar shaqo-dawladeed.

22) **Gaadiidka Badda:** waxaa loola jeedaa gaadiid kasta oo lagula safro biyaha dushooda sida bad, Webi, Haro IWM.

23) **Ka-ganacsi dad:** waxaa loola jeedaa qof ama dad si sharci darro ah looga faa'iidaysto;

24) **Tahriibin:** waxaa loola jeedaa Socdaal Sharci darro ah oo dad la galiyo;

25) **Dal-laawe:** waxaa loola jeedaa qof aan dal lahayn.

26) **Qof:** Waxaa loola jeedaa Sharcigaan gudihiisa qof leh shakhsiyad qaanuun

27) **Magangelyo-doon:** Waxaa loola jeedaa qof kasoo dalbaday Dowladda Soomaaliya ogolaansho daljoog ah arrimo la xiriira amnigiisa, diintiisa iyo jinsiyadiisa darteed si waafaqsan Heshiiska caalamiga ee Geneva 1951.

28) **Xeer-nidaamiye:** waxa loola jeeda xeer ay hay'addu soo saartay oo ku nidaaminayso arimaha socdaalka .

**Qodobka 4aad:**
**Baaxadda Sharciga**

Sharcigan waxaa keliya oo lagu maamulayaa hawlaha socdaalka ee ay qabato HSJS oo ah Hay'adda leh awood sharci fulineed, mid maamul ee arrimaha socdaalka iyo bixinta dukumentiyada safarka iyo hubintooda, si waafaqasan Sharcigan, Sharciga HSJS iyo Sharciyada kale ee dalka.

**CUTUBKA 2aad:**
**KAALINTA HAY'ADDA**
**Qodobka 5aad:**
**Ujeeddooyinka Sharcigan**

Ujeeddooyinka Hay'adda ee arrimaha socdaalka waa sida soo socota:

1) Gudashada waajibaadkeeda shaqo si waafaqsan Dastuurka JFS, Sharcigan iyo shuruucda kale ee Dalka JFS.
2) Meel-marinta iyo dhowrista xuquuqda aadanaha marka ay fulinayso hawlaheeda la xariira socdaalka, iyadoo la dhawrayo hadafka iyo ujeeddooyinka sharcigan, sharciyada kale ee dalka iyo xeerarka caalamiga ah.
3) Maamulka xudduudaha ee la xiriira dhammaan dadka soo gelaya ama ka baxaya dhulka JFS.
4) Bixinta iyo baabi'inta dal-ku-gal, joogitaan ku-meel-gaar ah iyo mid rasmi ah oo la siinayo ajaanibta soo galeysa ama joogeysa dhulka JFS iyo musaafurinta ajaanibta aan raaliga laga ahayn.
5) Bixinta dukumintiyada Safarka muwaadiniinta Soomaaliyeed meel walba oo ay joogaan.
6) Isku-xirka, nidaaminta iyo hagidda wixii socdaal ku saabsan hay'adaha dawladda iyo kuwa aan dawliga ahayn ee ka hawl-gala bar-xuduudeedyada dalka ee leh mas'uuliyadaha kala duwan.

**Qodobka 6aad:**
**Hab-Raaca Iyo Mas'uuliyadda Bixinta Oggolaanshaha Dal-Ku-Galka, Dal-Ku- Joogista Iyo Degista**

1) Bixinta iyo baab'inta oggolaanshaha dal-ku-galka, dal-ku-joogista iyo degista dhulka JFS, waxaa mas'uul ka ah HSJS, iyadoo raacaysa hab-raacyada ku cad Sharcigan iyo Sharciyada kale ee dalka.
2) Safaaradaha JFS ee dalka dibeddiisa, marka ajaanibtu ay ka dalbadaan oggolaansho dal-ku-gal (Entry Visa) waxay ka qabanayaan codsiyadooda iyo dukumentiyada looga baahanyahay si dhameystiran, waxayna u soo gudbinayaan Hay'adda.
3) Hay'addu marka ay hesho codsiyada iyo dukumentiyada Safaaradaha ka yimid oo ay oggolaato, kadib safaaraduhu waxay bixinayaan dalk-ku-galka.

**Cutubka 3aad:**
**U-Socdaalidda Soomaaliya**
**Qodobka 7aad:**
**Waajibaadka Saraakiisha Socdaalka**

Waajibaadka saraakiisha socdaalka ee Hay'adda waxaa ka mid ah hawlaha soo socda;

1) Maamulidda iyo fulinta arrimaha la xirriira soo-gelidda, joogista iyo degista dhulka JFS.
2) Xaqiijinta tilmaamaha ku qeexan sharcigan, hab-raaca iyo xeerarka lagu fulinayo iyo shuruucda kale ee dalka oo ku waajibinaya in uu raaco qofka ajnabiga ah ee doonaya in uu soo galo, ka baxo ama ku sugnaado dhulka Soomaaliya.

3) Hubinta dukumentiyada safarka ee qof kasta oo doonaya in uu soo galo ama ka baxo Soomaaliya ama qof kasta oo loo haysto sababo muujin kara in uu ku xad-gudbay Sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaasha lagu meel-marinayo, iyo sidoo kale wareysiga qof kasta oo ay ula muuqato in uu xog ka hayo tuhunka xad-gudubyadaas.
4) Hubinta dukumentiyada cadeynaya ka bad-qabka cudurada faafa ka hor inta aan la siin ogolaansha dal-ku-galka.
5) Ka-qaadista sawirrada, xogta gaarka ah (biometric) iyo macluumaadka kale ee lagama maarmaanka u ah soo galidda.
6) Hakinta, haynta iyo dib-u-celinta qof kasta oo ku soo galaya ama uga baxaya dhulka JFS hab sharci darro ah iyo ka qaadista tallaabada sharci ee ku habboon, sida ku cad Qodobadda Sharcigan iyo Sharciyada kale ee dalka.
7) Muwaadin kasta oo soomaali ah oo sifo sharci ah ku safraya ama kusoo galaya dhulka JFS lama hakin karo ayadoon oggolaansho laga haysan maxkamad.

## Qodobka 8aad:
## Dembiyada ay geystaan Saraakiisha Socdaalka

1) Qof kasta oo ka mid ah saraakiisha ama hawl-wadeennada hay'adda wuxuu galayaa dembi ay ka dhalan karto ciqaab, ganaax ama tallaabo anshax-marin, iyadoo loo tixraacayo sharciyada ay khuseyso, haddii uu geysto;
   a) Fududeynta safar sharci-darro ah;
   b) Sii-deynta qof amar xayiraadeed ka yaal ama la saaray;
   c) Qarinta xog la xirriirta fal-dembiyeed dhacay ama arrin aan dembi ahayn oo dembi looga dhigo qof safraya, isagoo ka-faa'iideysanaya awoodda hay'addu siisay;
   d) Ku-tallaabsiga musuq-maasuq iyo anshax-xumo lid ku ah Sharcigan, sharciyada kaleee dalka iyo hab-raacyada iyo siyaasadaha gaarka ah ee hay'adda.
2) Mar kasta waxaa ka mamnuuc ah saraakiisha socdaalka ee hay'adda geysashada ama ku kicidda dembiyada kale ee ku cad Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo sharciyada kale ee dalka inta ay ku guda jiraan gudashada wajibaadka hay'adda.

## Qodobka 9aad:
## Awoodaha Saraakiisha Socdaalka

Awoodaha Saraakiisha Socdaalka ay leeyihiin waxaa ka mid ah:
1) Baaritaanka iyo hakinta, gaadiid-badeedka (markab/doon iwm), diyaaradaha iyo baabuur kasta oo ka baxaya ama soo gaartay dhulka JFS, haddii ay jirto sabab keeni karta in looga shakiyo ku-xad-gudubka Qodobbada Sharcigan iyo halbeegyada caalamiga ah ee khuseeya.
2) Qabashada qof kasta oo la helo isagoo dembi socdaal ku dhex jira ama laga shakiyo, iyadoo aan loo haysanin amar warqad qabasho (Warrant of Arrest) haddii baahi degdeg ahi ay jirto, taasoo ay sababtay warqadda qabashada oo aan la heli karin waqtigaas ama ay dhici karto haddii aan la qaban oo la haynin qofkaas ay sababi karto in aan dib dambe loo helin iyo in uu baxsado.

## Qodobka 10aad:
## Waajibnimada Hortagista Saraakiisha Socdaalka

1) Qof kasta oo soo gelaya ama ka baxaya dhulka JFS waa in uu hortagaa saraakiisha socdaalka ee hay'adda.
2) Saraakiisha socdaalku waxay hubinayaan dukumentiyada iyo hadallada qofka si ay u xaqiijiyaan in ay waafaqsan yihiin oggolaanshaha lagu soo gelayo ama looga baxayo dhulka Soomaaliya.
3) Waxaa waajib ku ah qof kasta oo ka soo gelaya dalka JFS goob aysan joogin saraakiisha socdaalka, in uu si degdeg ah ugu wargeliyo Sarkaalka ku sugan goobta ugu dhaw.
4) Haddii aysan suurto-gal noqon in qof ajnabi ah si degdeg ah u tago xafiiska socdaalka ee ugu dhaw meesha uu ku sugan yahay, waa in uu 24 saac gudahood ku tagaa xafiis ka mid ah Hay'adda.
5) Haddii ay dhacdo in qof ajanabi ah uu hortagi waayo xafiisyada hay'adda sida ku cad faqrada 4aad ee qodobkan wuxuu mudanayaa tallaabo ciqaab, ganaax, musaafurin ama xayiraad, iyadoo la tixgalinayo hadba muddada uu sharci-darrada ku joogay iyo arrinta uu dalka u soo galay.

## CUTUBKA 4AAD:
## SHURUUDAHA SOO-GELISTA, JOOGISTA & DEGISTA DHULKA JFS
## Qodobka 11aad:
## Bar-xudduudeedyada iyo Shuruudaha Soo-gelista Dhulka JFS

1) Astaameynta bar-xuduudeedyada dalka laga soo galo ama laga baxo waxaa lagu soo saarayaa laguna faahfaahinayaa Xeer-nidaamiye iyo hab-raac u gaar ah oo ay soo saarto Hay'addu, lagana ansixiyo Golaha Wasiiradda Xukuumadda JFS.
2) Sida ku cad Sharcigani bar-xudduudeedyada lagu tilmaamay faqradda (1) ee Qodobkan waxay ahaanayaan rugaha rasmiga ah ee laga soo galo lagana baxo ee dhulka JFS.
3) Rakaabka imaanaya ee soo galaya Soomaaliya waxaa laga doonayaa sida ku cad Sharcigani in ay ku buuxiyaan xog-tooda oo dhamaystiran Foomka Rakaabka ee yaala bar-xuduudyada ee ah irdaha laga soo galo dalka.
4) Booqashada gaaban ee ay isugu gudbaan bulshooyinka xudduudaha wada degan, way ka duwanaanayaan shuruucda lagu dhaqayo bar-xudduudeedyada, waxaana lagu soo saarayaa xeer-nidaamiye iyo hab-raac u gaar ah deegaan kasta.
5) Ajnabiga waxaa loo oggolaanayaa in uu soo galo am ka baxo dhulka JFS, haddii uu haysto:
    a) Baasaboor sax ah oo ugu yaraan waqtigiisa dhicitaan ay ka dhimantahay muddo Lix (6) bilood ah ama dukumenti kale oo safar oo sharci ah oo muujinayana in uu leeyahay qofka sita; iyo
    b) Oggolaansho (dal-ku-gal) sax ah oo lagu soo galo ama looga baxi karo dhulka JFS, si waafaqsan Sharcigan.

## Qodobka 12aad:
## Shuruudaha Oggolaanshaha Soo-gelitaanka iyo Joogitaanka

1) Si waafaqsan Sharcigan, qofka ajnabiga ah wuxuu soo geli karaa ama joogi karaa dhulka JFS, haddii uu haysto mid kamid ah oggolaanshiyadan soo socda:
    a) Oggolaansho dal-ku-gal dalxiis;
    b) Oggolaansho maritaan dal (transit);
    c) Oggolaansho dal-ku-gal waxbarasho ama cilmi-baaris;
    d) Oggolaansho dal-ku-gal sababo gaar ah;
    e) Oggolaansho joogitaan muddaysan;
    f) Oggolaansho dal-ku-gal soo-noqnoqasho aan xaddidnayn ah (Multiple Entry Visa);
    g) Oggolaansho deganaansho rasmi ah;
    h) Oggolaansho Caafimaad;
    i) Oggolaansho dal-ku-gal ganacsi; iyo
    j) Oggolaansho dal-ku-gal shaqo.
2) Oggolaanshaha lagu xusay faqrada (1) ee Qodobkaan, haddii la helo dalab ka yimaada codsadaha, waxaa bixinaya sarkaalka socdaalka ee awoodda u leh si waafaqsan Qodobka 7aad faqraddiisa (1) ee Sharcigan, waxaana loo soo saarayaa dukumenti ahaan ama dal-ku-gal caddeynaya nooca oggolaanshaha kaas oo sidoo kale lagu muujinayo dukumentiga safarka ee codsadaha.
3) Oggolaanshuhu wuxuu noqon karaa warqad, shaabbad ama dhejis (sticker) la saarayo dukumentiga safarka, hadba sida uu dhigayo hab-raaca bixinta oggolaanshaha, iyadoo shaabbadda iyo dhejisku ay muujinayaan mid ka mid ah noocayada oggolaanshaha ku qeexan Qodobkan 12aad (1) ee Sharcigan.

## Qodobka 13aad:
## Oggolaansho Dal-ku-gal Dalxiis

1) Oggolaansho dal-xiis waxaa la siin karaa ajnabiga doonaya in uu dhulka Soomaaliya u yimaado:
    a) Ujeeddooyin dalxiis; ama
    b) Sabab kasta oo leh dabeecad muddeysan, taasoo ula muuqata Hay'adda socdaalka mid u qalanta in lagu siiyo oggolaansho soo-gelid dal-xiis.
2) Bixinta oggolaansho dal-xiis waxaa shuruud looga dhigayaa haysashada tikit (ticket) laabasho iyo mid muujinaya in qofku uu dal kale u sii gudbayo ama dammaanad ballan-qaadaysa kharashaadka inta lagu gudo jiro muddada joogitaanka Soomaaliya ee uu codsaduhu weydiistay.
3) Marka oggolaansho soo-gelid dalxiis aysan si cad u sheegayn xaalado gaar ah oo ku aaddan soo-gelidda iyo joogidda dhulka JFS, muddada joogidda kama dheeraan karto saddex (3) bilood oo ka bilaabanaysa taariikhda soo-gelidda.
4) Iyadoo la tixgelinayo codsiga qofka doonaya in uu dheeraysto muddada oggolaanshaha dal-xiiska, waxaa loo kordhin karaa Labo (2) mar muddada joogitaanka, isagoo halkii marba loo kordhin karo muddo u dhiganta Saddex (3) bilood.

**Qodobka 14aad:**
**Oggolaansho dal-ku-gal Maritaanka Dalka**

1) Oggolaansho maritaanka dalka (transit) waa la siin karaa qof ajnabi ah, haddii:
    a) Ujeeddada uu Soomaaliya u yimid ay tahay in uu uga sii gudbo meel kale oo uu usocdo, taasoo ka baxsan dhulka JFS; iyo
    b) Uu wato dukumentiga saxda ah ee looga baahan yahay si uu u galo dalka uu u socdo;
2) Bixinta oggolaanshaha maritaanka dalka waxaa shuruud u ah haysashada Tikit (ticket) sax ah oo muujinaya dalka uu qofku u sii gudbayo ama qaab saxan oo uu safarka ku sii wadan karo; ama haysashada kharash dabooli kara baahida qofka ajnabiga ah.
3) Qofka ajanbiga ah, inta uu joogo dhulka JFS muddada maritaanka dalka, haddii aysan jirin wax ka baxsan awoodda qofka la siinayo kama badnaan karto Saddex (3) maalmoodah, laga bilaabo maalinta soo-gelitaankiisa.

**Qodobka 15aad:**
**Oggolaanshaha dal-ku-gal Waxbarasho ama Cilmi-baaris**

1) Oggolaanshaha dal-ku-galka waxbarasho ama cilmi-baaris, waxaa la siin karaa ajnabiga doonaya in uu u yimaado dhulka JFS, iyadoo ujeeddadiisu tahay in uu ku qaato tababarro ama ku biiro hay'ado waxbarasho, haddii ay hay'adahaasi yihiin kuwo ay aqoonsan tahayWasaaradda Waxbarashada, Xukuumadda JFS.
2) Bixinta Oggolaansho waxbarasho waxay ku xirnaan kartaa haysashada dammaanad-qaad xaqiijinaya in qofka shisheeyaha ah uu haysto awood dhaqaale oo muujineysa in uu isku filnaan karo inta uu ku sugan yahay dhulka JFS.
3) Oggolaanshaha ujeeddadiisu tahay waxbarasho wuxuu xaq u siinayaa ajnabiga in uu soogalo kuna sugnaado Soomaaliya, inta uu ku gudo-jiro muddada waxbarashadiisa, waxaana intaasi wehliya shuruudaha oggolaanshaha.

**Qodobka 16aad:**
**Oggolaansho dal-ku-gal Sabab Gaar ah**

Iyadoo lala tashanayo Wasaaradda Arrimaha Dibedda waxaa la siin karaa oggolaansho u imaatin sabab gaar ah shakhsiyaadka ay casuumtay Dawladda Soomaaliya ee ku imaanaya booqasho rasmi ah ama mid aan rasmi ahayn ama ka-qeyb-gal shirar labo- geesood ah ama kuwa dalal badani ay qeyb ka yihiin.

**Qodobka 17aad:**
**Oggolaansho dal-ku-gal Soo-noqnoqosho Aan Xaddidneyn**

Oggolaanshaha soo-noq-noqoshada aan xaddidneyn waxaa codsan kara oo la siin karaa:
1) Ajnabi kasta oo dhulka JFS ku soo galay si sharci ah ugu yaraan labo jeer, ka hor intauusan dalban oggolaanshaha uu hadda kusoo galay.
2) In uu soo buuxiyo shuruudaha ku cad Qodobka 11aad faqrada (3) ee Sharcigan.
3) In uu helo dammaanad sharci ah, cinwaanka damiintaha iyo meesha uu ku soo degayo.

4) In uu caddeeyo sababta uu u qaadanayo oggolaanshaha soo noq-noqoshada oo faahfaahsan.
5) Ajnabiga kusoo gala dalka ogolaanshiyahan ee uu ku gaabato waqtiga waxaa loogu dari karaa illaa muddo Hal (1) bil ah, balse kuma soo noqon karo muddadaas loo kordhiyey haddii uu ka baxo dalka.

## Qodobka 18aad:
## Oggolaansho Joogitaan Muddeysan

1) Bixinta oggolaanshaha joogitaanka muddeysan waxaa la siin karaa Ajnabi kasta, marka laga reebo ajnabiga aan raalli laga ahayn haddii uu la yimaado arrimaha soo socdo:
    a) Marka uu yahay mid wata oggolaansho la aqbali karo oo waafaqsan Qodobka 12aad ee (1) ee Sharcigan; ama
    b) Haddii uu dammaanad kala yimaado qofka daneynaya ama qof kale, isla markaana sarkaalka hay'addu uu ku qanco dammaanaddaas.
2) Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda wuxuu ka dhaafi karaa qofka ajnabiga ah ee codsanaya oggolaansho deganaansho joogitaanka muddeysan, shuruudaha ku xusan farqadda (1) (ii) ee Qodobkan, marka ay caddaato in ajnabigu haysto qaabab kale oo uu ku dabooli karo baahidiisa inta uu ku gudo-jiro joogitaanka loo oggolaaday ee dalka, sidoo kalena uu dabooli karo kharashka tikit-ka laabashada ama kharashka safarka dal kale.
3) Oggolaansho joogitaan kasta oo aan ahayn joogto (permanent), waa in ay si cad u tilmaantaa muddada qofka ajnabiga ah uu joogayo dalka. Haddii uusan qofka ajnabiga ahi haysan oggolaansho waafaqsan Qodobkan 12aad (sh) ee Sharcigan, kama qeyb geli karohawlo faa'iido laga helayo dalka gudihiisa.
4) Muddada oggolaanshaha joogitaanka muddeysan kama badnaan karto Hal (1) sano.
5) Qofka haysta oggolaanshaha joogitaan muddeysan wuxuu u hoggaansamayaa shuruudaha ku cad oggolaanshaha la siiyey.

## Qodobka 19aad:
## Oggolaansho Deganaansho Rasmi Ah

1) Oggolaansho deganaanshaha rasmi ah waxaa la siin karaa ajnabiga leh sumcad wanaagsan, isla markaana codsada oggolaansho, kaddib marka uu Soomaaliya ku joogay si sharci ah muddo aan ka yarayn Shan (5) sano oo xariir ah.
2) Faqradda (1) ee Qodobkan, waxaa lagu dhaqayaa labada qof ee is-qaba iyo caruurta ka yar sideed iyo toban (18) sano ee la nool qofka ajnabiga ah ee la siiyey oggolaanshaha deganaanashaha rasmiga ah.
3) Oggolaanshaha way dhacaysaa, haddii qofka la siiyey uu ka maqnaado dalka Soomaaliya muddo ka badan lix (6) bilood oo xariir ah.

## Qodobka 20aad:
## Oggolaansho Ganacsi

1) Oggolaanshahan waxaa la siin karaa ajaanibta doonaysa in ay ganacsi ama maal-gashi kasameeyaan dhulka JFS, waxaana lagu hawl-gelin karaa shuruudaha soo socda:
    a) In ajnabigu uu ganacsiga ku darso saami maaliyadeed ama raasu-maal;
    b) In qofka ajnabiga ah uu ballan-qaado in uu u hoggaansamayo shuruudaha ku cad Sharciga Maalgashiga Shisheeye Soomaaliya ee soo baxay 21/01/2016.
2) Ajnabiga haysta oggolaanshahan wuu ka ganacsan karaa dalka JFS, waana loo shaqeyn karaa, isagoo dhowraya sharciga shaqaalaha shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo sharciyada kale ee dalka ee xiriirka la leh ganacsiga iyo arrimahiisa.

## Qodobka 21aad:
## Oggolaansho dal-ku-gal Shaqo

1) Oggolaanshahan waxaa la siinayaa ajaanibta ku imaanaya shaqo dhulka JFS, marka ay oggolaansho shaqo ku helaan si waafaqsan "Sharciga Shaqo-qorista Shaqaalaha Shisheeye ee soo baxay 09/11/2015.
2) Marka oggolaanshaha shaqada la siinayo qof ajnabi ah, Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada waxay tixgelinaysaa in muwaadin Soomaali ah uu qaban karo shaqadaas iyo in kale.
3) Waxaa reeban in shaqo uu qaban karo muwaadin Soomaaliyeed loo qoro qof ajnabi ah, waxaana hubinayo fulinta faqradan Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada oo kaashanayso Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda.
4) Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada iyo dhammaan hay'adaha kale ee dawladd, shirkadaha ama ganacsiga gaarka loo leeyahay ee ay khuseyso shaqada uu qabanayo qofka shisheeyaha ah waxaa xil ka saaran yahay la socodka shaqada uu qabanayo qofkaas ajnabiga ah.
5) Oggolaanshaha shaqada waxay caddeynaysaa in:
    a) Adeegga shaqo ee uu qofka ajnabiga ahi qabanayo; iyo
    b) Muddada uu sharci ahaan oggolaansho u haysto.

## Qodobka 22aad:
## Waajibaadka Saaran Qofka Ajanabigu u Shaqeynayo

Qofka Soomaaliga ah ama degan dhulka JFS ee uu u shaqeynayo qofka ajanabiga ah ee loo oggolaaday in uu soo galo dhulka JFS, waxaa laga rabaa;

1) In uu siiyo qofka ajnabiga ah shaqadii loo oggolaaday in uu qabto, iyadoo la tixgelinayo nooca oggolaanshaha shaqada.
2) In uu keeno marka laga dalbado qofka ajnabiga ah, aqoonsiga, macluumaadka iyo nuquladda heshiiska shaqada ajnabiga shaqaalaha ah.
3) In uu ogeysiiyo Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda, iyo hay'adaha kale ee ay khuseyso marka qofka ajnabiga ah ay shaqadu ka dhammaato ama uu qabto shaqo ka duwan middii loo dalbaday.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE
JAMHUURIYADDA FEDERALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA
THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC
HOUSE OF THE PEOPLE
GOLAHA SHACABKA

4) Marka shaqada uu dalka ka hayey qofka ajnabiga ah ay joogsato, sababta ay doonto ha noqotee, loo-shaqeeyaha waxaa looga baahan yahay in uu ogeysiiyo Wasaaradda Shaqadaiyo Arrimaha Bulshada, iyo Hay'adda muddo Shan iyo toban (15) maalmood gudahood ah oo ka billaabanaysa taariikhda ay shaqadu ka dhammaatay ama laga saaray shaqada.

**Qodobka 23aad:**
**Dammaanad**

1) Dammaanadda uu tilmaamayo Qodobkan, waxaa bixin kara loo-shaqeeyaha doonaya in uu qofka ajnabiga ah siiyo shaqo uu ka qabanayo gudaha dhulka JFS.
2) Loo-shaqeeyaha waxaa laga dhigayaa "caddeyn qoraal ah", isagoo Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda u sameynaya dammaanad qoraal ah, in uu mas'uul ka yahay qofka ajnabigaah iyo in uu ku celinayo dalkiisa uuna daboolayo kharashaadkiisa.

**Qodobka 24aad:**
**Cusbooneysiinta Dammaanadda**

1) Marka joogitaan la siiyey qof ajnabi ah la cusbooneysiinayo, dammaanadda ku xiran iyo muddadii ay xaddiday Hay'adda ee ku cad qodobka 23aad ee sharcigan, iyadana dib ayaa loo cusbooneysiinayaa.
2) Haddii qofka loo-shaqeeyaha ah iyo qofka ajanabiga ah ku heshiiyaan shaqo ka beddelanmiddii hore iyo waqti ka dheer muddadii hore, iyadoo la tixgalinayo xaaladda is-beddelka,Hay'addu waxay dalban kartaa caddeymo iyo dhammaand dheeraad ah.

**Qodobka 25aad:**
**Baabi'inta Dammaanadda**

1) Haddii qof ajnabi ah oo la siiyey joogitaan dammaanad leh dhulka Soomaaliya, kadibna la siiyo deganaansho joogto ah dammaanaddii magaciisa lagu bixiyey way baaba'aysaa.
2) Haddii qofka ajnabiga ah la siiyey joogitaan ku xiran shuruud dammaanad leh oo uu si kama-dambeys ah uga baxayo dhulka JFS, isla markaana uu la yimaado kharashkii uu kubixi lahaa ee ku noqoshada dalkiisa, waxaa la baabi'inayaa dammaanaddii hore loogu sameeyey, waxaana la siinayaa wixii kale ee horay looga hayey, marka ay isku waafaqaan qofkii uu damaanadiisa dalka ku joogay.
3) Qofka ajnabiga ah oo dalka ku yimid shaqo damaanad leh, kama qaban karo dalka shaqokale inta ay jirto mudadii damaanadii hore loogu keenay, haddii uu raalli ka yahay qofkiiuu damaanadiisa dalka ku joogay in la soo gaabiyo muddadii joogitaankiisa waa la baa'inayaa joogitaankii iyo damaanaddii hore, dalka ayuuna ka baxayaa.

**Qodobka 26aad:**
**Wax-ka-bedelka iyo kala-noqoshada Joogitaanka**

1) Agaasimaha Guud ee Hay'adda, isagoo wargelinaya Wasiirka Amniga Guddaha, wuxuu awood u leeyahay in uu wax-ka-beddelo ama kala-noqdo oggolaanshe kasta oo

lagu soo saaray Sharcigan, marka ay yimaadaan xaaladaha soo socda, isagoo qaab qoraal ah ku muujinaya go'aankiisa:

a) Haddii qofka haysta oggolaanshaha ama wakiilkiisa uu bixiyey macluumaad khaldan,markii codsiga oggolaanshaha la soo gudbiyey ama oggolaanshaha lagu helay matalaad been ah, xog si ula-kac ah looga tegay ama la qariyo xog muhiim ah; iyo
b) Haddii qofka haysta oggolaanshaha uu ku guul-darreysto in uu dhawro mid ka mid ah shuruudaha ku cad oggolaansha ama qofka haysta oggolaansha uu ku lug yeeshay shaqo aan ahayn shaqadii lagu siiyey oggolaanshaha, isagoo aan haysan fasaxa Hay'adda ama kan Wasaaradda Shaqada & Arrimaha Bulshada.

2) Wasiirka Amniga Gudaha wuxuu markasta baabi'in karaa oggolaansho soo-gelid ama midda deegaan ee la siiyey qof shisheeye ah, si waafaqsan Sharcigan, isagoo faraya Hay'adda, caddeynayana sababta keentay in la baabi'iyo oggolaanshaha qofka ajanabiga ah.
3) Haddii oggolaansho joogitaan lagala noqdo qofkii la siiyey, waxaa la soo saarayaa wargalin ku saabsan kala-noqoshadaas, si waafaqsan Sharcigan, wuxuuna noqonayaa sida soo socota:

a) Waxaa shakhsi ahaan lagu wargelinayaa go'aanka kala-noqoshada qofkii haystay oggolaanshaha; iyo
b) Sababaha kala-noqoshada keentay, taariikhda kala-noqoshadu ay dhaqan-gelayso, iyo waqtiga kama dambeysta ah ee ka bixitaankiisa dalka.

4) Haddii qofka ajnabiga ah ay ka dhamaato muddadii oggolaanshaha, waa in uu dalka kabaxaa marka uu dhiibo lacagta ay keentay mudadii uu dhacsanaa oggolaanshuhu, sida ku cad Qodobka 54aad ee Sharcigan.
5) Qofka ajnabiga ah waxaa kale oo lagala noqon karaa oggolaanshaha joogitaan ee dalka markii uu ku dhaco xukun maxkamadeed oo ciqaab ah.

## Qodobka 27aad:
## Khidmada Oggolaanshaha Soo-gelista, Joogista iyo Degista Dalka JFS

1) Bixinta iyo cusbooneysiinta oggolaanshaha ku cad faqradaha kala duwan ee Qodobbada Sharcigan waxay ku xiran yihiin bixinta khidmadaha uu jaangoyntooda Sharci gaar ah kusoo saarayo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

2) Bixinta iyo cusbooneysiinta oggolaanshaha uu qeexayo Sharcigan waxaa shardi u ah in qofka loo soo saarayo oggolaanshaha uu bixiyo khidmadda ku waajibtay ee lagu soo saarayo oggolaanshaha.

## Qodobka 28aad:
## Ka-dhaafidda Khidmadaha oggolaanshaha dadka leh Mudnaanta iyo Xasaanadaha la Xiriira Heshiisyada Caalamiga ah

1) Qodobbada Sharcigan saameyn kuma yeelanayaan Heshiisyada Caalamiga ah oo ay qeybka tahay Dawladda Soomaaliya, kuwaas oo la xirrira ka dhaafidda khidmadaha

ogolaanshaha dadka leh mudnaanta, sharafta iyo xasaanadaha gaarka ah ee Dawladda Soomaali aqoonsan tahay.

2) Khidmadaha oggolaanshaha waxaa laga dhaafayaa dadka soo socda:
   a) Ajnabiga u yimaada dalka hawl diblomaasiyadeed marka ay ku soo galo sifo sharci ah, isla markaana ay oggolaatay Wasaaradda Arrimaha Dibadda, Xukuumadda JFS;
   b) Ajnabiga heshiis toos a kula jooga Dowladdda Federaalka Soomaliya oo ay Dowladdu u igmatay qabashada shaqo muhim u ah dalka iyo
   c) Shaqaalaha rasmiga ah ee Qaramadda Midoobay (UN) ee haysta dukumentiga safar ee Qaramadda Midoobay.

## CUTUBKA 5aad:
## HABKA LOO RAACAYO DADKA SAARAN GAADIIDKA BADDA, DIYAARADAHA IYO BAABUURTA SOO GELAYSA AMA KA BAXAYSA DHULKA JFS

### Qodobka 29aad:
### Waajibaadka Bixinta Liiska (Manifest List) ee Rakaabka Saaran Gaadiidka Badda, Diyaaradaha Iyo Baabuurta Soo-gelaya Dhulka JFS

1) Qofka mas'uulka ka ah gaadiid bad, diyaarad ama Baabuur kasta ee soo galaya ama ka baxaya mid ka mid ah bar-xudduudeedyada dhulka JFS, waa in uu la wadaagaa SarkaalkaSocdaalka nuqul uu saxiixay qof awood u leh oo sheegaya ama caddeynaya magacyada rakaabka, xubnaha shaqaalaha iyo haddii ay jiraan dad kale oo saaran gaadiidka oo loo kala saaray darajooyinkooda shaqo, isla markaana uu bixiyo wixii macluumaad ah ee laga codsado.
2) Haddii aan la helin liiska rakaabka saaran gaadiidka ama ay soo baxdo khaladaad ku jira ama dad dheeraad ah oo gaadiidka saaran, waxaa la hakinayaa gaadiidkaas socodkiisa, iyadoo laga qaado tallaabo kale oo sharciga waafaqsan, sida ku cad Qodobka 31aad ee Sharcigan iyo si waafaqsan shuruucda caalamiga ah.

### Qodobka 30aad:
### Soo-gelid Ku-meel-gaar ah

Hawl-wadeennada Xafiisyada Socdaalka waxay awood u leeyihiin bixinta oggolaanshaha imaatinka dadka safarka ah ama shaqaalaha gaadiidka Badda, Diyaaradaha ama Baabuurka in ay si ku-meel-gaar ah dalka ku soo galaan, iyadoo la raacaya tilmaamaha ku faahfaahsan faqradaha kala duwan ee Qodobka 12aad ee Sharcigan,

### Qodobka 31aad:
### Ciqaabta Uu Mudanayo Milkiilaha, Wakiilka Ama Qofka Mas'uulka Ka Ah Gaadiidka Badda, Diyaaradaha Iyo Baabuurta

1) Marka ajnabi aan raali laga ahayn uu soo galo Dhulka Soomaaliya, isagoo ku yimid gaadiid Bad, Diyaarad ama Baabuur, iyadoo milkiilaha, wakiilka ama qofka mas'uulka kaah Gaadiidka Badda, Diyaaradda ama Baabuurka uusan ka war hayn, markaas oo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA HOUSE OF THE PEOPLE GOLAHA SHACABKA

kale ajnabiga iyo milkiilaha, wakiilka ama qofka mus'uulka ka ah waxaa loo ciqaabayaa mid kasta si gaar ahaantiisa ah.

2) Haddii uusan falku keenayn fal-dembiyeed aad u culus, qofka waxaa lagu ganaaxayaa Lacag Shillin Soomaali u dhiganta "Kun illaa Saddex Kun doollarka Maraykanka" ($1,000 illaa $3,000) iyo qaraamaadka kale ee ku waajibay marka la xaqiijiyo muddadii uu dalka joogay.
3) Haddii uu yahay gaadiidku mid keenay qof ku sifaysan si sharciga aan waafaqsaneyn, sida diyaarad ama markab gaanaaxa la saarayo wuxuu noqonayaa ugu yaraan Shillin Soomaaliu dhigma "Saddex Kun illaa Shan iyo Toban Kun Doollarka Mareykanka" ($3,000-$15,000). waxaana lagu qeexayaa xeer-nidamiyaha lagu dhaq-galinayo Sharcigan.
4) Xukunka ku xusan Faqradda (2) ee Qodobkan, laguma dhaqayo marka ajanabigaas aan raaliga laga ahayn uu haysto oggolaansho sax ah oo lagu bixiyey si waafaqsan Sharcigan.

## Qodobka 32aad:
## Maxkamadda Awoodda U Leh Xayiraadda Gaadiidka Badda, Diyaaradaha Iyo Baabuurta

1) Haddii ajnabi aan raalli laga ahayn uu soo galo dhulka Soomaaliya, Maxkamadda awoodda u leh waxay go'aamin kartaa sii haynta ama sii deynta markabka, diyaaradda ama baabuurkii lagu keenay dalka qofkaas ajnabiga ah la xayiro illaa iyo inta milkiilaha, wakiilka ama qofka mas'uulkaka ah uu fuliyo hab-raaca lagama maarmaanka u ah musaafurinta ajaanibta.
2) Haddii milkiilaha, wakiilka ama qofka mas'uulka ka ah la ganaaxay sida ku xusan Qodobka 32aad (3) ee sharcigan, Maxkamadda awoodda u leh waxay go'aamin kartaa sii haynta ama sii deynta gaadiidka badda, diyaaradda ama baabuurka la sii hayo illaa milkiilaha, wakiilka ama qofka mas'uulka ka ah uu ka bixinayo ganaaxa la saaray si waafaqsan Sharciga.

# CUTUBKA 6aad:
# WAAJIBAABKA AJAANIBTA IN AY SHEEGAAN CINWAANNADOODA
## Qodobka 33aad:
## Waajibaadka Ajaanibta Ka Saaran Sheegista Cinwaannadooda

Waxaa waajib ku ah ajaanibta joogta dhulka JFS in ay qoraal ahaan ugu wargeliyaan Saraakiisha Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda halka ay degan yihiin ama wixii is-beddelah oo ku yimaada cinwaannadooda deegaan waqti kasta,

## Qodobka 34aad:
## Goobaha Dhulka ee Ka Reebban Ajaanibta

Wasiirka Amniga Gudaha wuxuu awood u leeyahay, isagoo la tashanaya Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga ama ciddii kale ee ay khuseyso in uu soo saaro qodobbo kareebaya qofka kasta oo ajnabi ah in uu galo soohdimo cayiman oo dalka Soomaaliya ka mid ah, iyadoo marka hore si guud loo shaacinayo goobahaas, waxaana sidaa loo yeelayaa sababo xagga amniga awgeed ah ama arrimo kale oo danta guud ee Qaranku ku jirto reebitaankooda.

## Qodobka 35aad:
## Shaqo-Ka-Joojinta Qofka Ajnabiga Ah

1) Oggolaanshaha shaqada ma sii jireyso haddii qofka ajnabiga ah uu ku jiro labadan xaaladood midkood:
   a) In uusan haynin shaqadii uu u qaatay oggolaanshaha; ama
   b) In uu ku lug yeesho shaqo ka duwan middii ku caddeyd oggolaanshaha shaqada.
2) Haddii qof ajnabi ah si lama filaan ah u soo gaba-gabeeyo shaqadiisa, waa in uu la socodsiiyaa Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, iyo Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed muddo todobo (7) maalmood gudahood ah oo ka billaabanaysa maalinta ay shaqadu ka dhammaatay qofkaas.

## Qodobka 36aad:
## Ku-Ekaanshaha Ajaanibta Shaqadda Ay Dalka U Yimaadeen

1) Qof kasta oo ajnabi ah oo dalka loo keenay in uu qabto shaqo cayiman taasoo qof muwaadin Soomaaliyeed ah uusan lahayn aqoonteeda, waxaa ka reeban in uu qabto shaqo kale oo ka duwan middii loo keenay dalka.
2) Waxaa kale oo qofka ajnabiga ah ka reeban in uu iskiis u abuurto shaqo si madax-bannaan, sida haddii ay dhacdo in uu ku fakero in uu samaysto shirkad ama wax la mid ah oo uu si madax-bannaan uga hawlgaliyo dalka, waxaa ku waajib ah haddii uu rabo in uu si iskiis ah shaqo u abuurto:
   a) In uu ku wargalinayo joojinta shaqadiisii hore Xafiiska Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada iyo HSJS ugu badnaan toddobo maalmood gudahood laga billaabo maalinta shaqadii uu yahay uu ka joogsaday; iyo
   b) In uu dalka ka baxo kana soo codsado oggolaansho dalka dibaddiisa, isagoo raacayo Faqradda (3) ee Qodobkan.
3) Qof kasta oo ajnabi ah oo doonayo in uu ka shaqeeyo dalka, waa in uu kasoo codsadaa Safaaradaha JFS ku leedahay dalka dibaddiisa, kadibna Safaaraduhu u soo gudbiyaan Hay'adda, oo iska leh oggolaashaha iyo diidmada dal-ku-galka iyagoo mid walba sababaynaysa.
4) Mar kasta oo Hay'adda Socdaalka ay soo gaaraan arrimaha ku xusan faqradaha (1, 2 iyo 3) ee Qodobkan, waa in lagu saleeyo go'aanka shuruucda khuseysa shaqadaas, sida sharciga maal-gashiga, sharciga shaqo-qorista shaqaalaha shisheeye iyo Sharcigan, lana hubiyaa haddii ay jireen xad-gudubyo la xariira shaqadiisii hore qofka ajanabiga ah.

## Qodobka 37aad:
## Ajnabiga Aan Raalli Laga Ahayn

1) Haddii ay dhacaan duruufaha soo socda, qofka ajnabiga ah waxaa loo aqoonsan karaa inuu yahay mid aan raalli laga ahayn, waxaana loo diidi karaa in uu dalka soo galo ama waxaa laga masaafurin karaa dalka si waafaqsan Sharciyada dalka.
   a) Haddii loo keeno amar masaafurin ah oo ka soo baxay Dawladda JFS, laguna soo saaray sida uu qabo Sharcigan ama sharci kale oo xilligaas dhaqan-gal ah;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA · THE UPPER HOUSE · AQALKA SARE

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC · HOUSE OF THE PEOPLE · GOLAHA SHACABKA

b) Haddii uusan haysan dhaqaale ku filan noloshiisa;
c) Haddii uu ku lug yeesho ka-shaqeynta ama daabulidda maan-dooriye ama walxo kale oo shuruucda dalku mamnuuceen;
d) Haddii uu ku lug yeesho ama looga shakiyo si mug leh in uu ku lug leeyahay ka-ganacsiga dadka/tahriibinta ama ka-ganacsiga sharci-darrada ah ee xubnaha bani'aadamka;
e) Haddii uu ku lug yeesho ama looga shakiyo si mug leh in uu ku lug leeyahay keenista iyo ka ganacsiga hub ama rasaas sharci-darro ah;
f) Haddii saraakiisha caafimaadka dawladda ay xaqiijiyaan in qofka shisheeyaha ahi uuqabo cudur halis ku ah nolosha iyo fayo-qabka caafimaadka bulshada;
g) Haddii uu dhulka Jammuuriyadda Federaalka Soomaaliya ku soo galay si sharci-darro ah, isagoo aan haysan dukumentiyada safarka ee saxda ah ama oggolaansho sida ku cad Qodobbada 11aad iyo 12aad Sharcigan;
h) Haddii uu yahay codsade hore looga diiday codsigiisa ah in loo aqoonsado qaxootinimo, iyadoo la eegayo Sharciyada dalka iyo Axdiga Jineefa (Geneva Convention) ee 1951;
i) Haddii joogitaanka qofka ama oggolaanshihiisu uu halis ku yahay nidaamka dadweynaha, amniga qaranka, danta guud, akhlaaqda ummadda & diinta.

2) Go'aanka ah in qof shisheeye ah uu yahay mid aan raalli laga ahayn waxaa lagu go'aaminayaa sida ku cad Faqradda (1) (b illaa sh) ee Qodobkan, marka laga reebo dadka dalka looga saaro go'aannada siyaasadeed.

## Qodobka 38aad:
## Waajibaadka Saraakiisha Socdaalka Ee Ku aadan Ajnabiga Aan Raalliga Laga Ahayn

1) Saraakiisha Socdaalka ee ka hawl-gala xarumaha kala duwan ee Hay'adda waxaa sharci ahaan ku waajib ah:
   a) In ay hakiyaan una gudbiyaan Booliska qof kasta oo ajnabi ah oo aan raalli laga ahayn, kaasoo lagu helay in uu ku xad-gudbay Sharcigan, isagoo ku sugan dhulka Soomaaliya, isla markaasna ay ku wargeliyaan Maxkamadda awoodda u leh, iyadoo la tixgelinayo hab-raacyada Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Xeerarka kale ee dalka oo xiriirka laleh arrintaas;
   b) In ay ka hor-istaagaan ajnabiga aan raalli laga ahayn in uu ka soo dego, gaadiidka badda, diyaarad, baabuur ama gaadiid kale oo ku sugan dhulka JFS ama lug ku soo galo, haddii uusan ahayn qof qaxootinimo doonaya; sama
   c) In ay u masaafuriyaan ajnabiga aan raalliga laga ahayn dalkii uu u dhashay ama dalkii uu safarkiisa u danbeeyey ka soo billaabay.
2) Qofka ajnabiga ah waa in uu dalka uga baxaa sida ugu dhaqsaha badan oo ah muddo aan ka badneyn todobo (7) maalmood, laga billaabo taariikhda lagu wargeliyey, haddii aan Maxkamadi ku xukumin muddo intaas ka duwan.
3) Muddada diyaarinta safarkiisa waxaa lagu haynayaa xabsiga ama haday jiraan goobo loo cayimay in lagu hayo dadka noocaas ah.

## Qodobka 39aad:
## Dadka La Masaafurinayo

1) Qofka ajnabiga ah waa laga saarayaa dalka, haddii Maxkamadda awoodda u leh ay amarto saaritaankiisa, muddo sharci ah oo cayiman gudaheed.
2) Ajnabiga ay go'aan siyaasadeed Dowladdu ku soo saarto in dalka laga saaro.
3) Ajnabiga ku xad-gud-guba sharciyadda dalka waxaa dalka looga saaraayaa goo'aanka Wasiirka Amniga Guddaha. Waxaa si qoraal ah lagu gaarsiinayaa qofka ajnabiga ah iyo dhinacyada ay khuseyso go'aanka kasoo baxa Wasiirka Amniga Gudaha ama hay'addii kale ee awood u leh oo tilmaamaya in uu yahay qof aan raalli laga ahayn.
4) Go'aanka soo baxay waa in uu wehliyaa amarka saaritaanka oo waqtigiisu cad yahay iyo sidoo kale hab-raaca loo marayo.
5) Qofka ajnabi ah ee lagu amray in uu ka baxo dhulka JFS, waa la sii hayn karaa haddii uusidaas oggolaado, inta laga dhammeystirayo hawlaha looga saarayo dalka, iyo sidoo kale haddii ay hay'adda ula muuqato in ajnabigaas baxsan karo ama carqalad kale geysan karo inta hawlihiisa laga dhameystirayo.

## Qodobka 40aad:
## Dhigista Curaar Si Loo Fuliyo Amarka Masaafurinta

1) Waxaa lagu amri karaa qofka ajnabiga ah ee laga saarayo dalka JFS in uu dhigo lacag curaar ah (deposit) oo ku filan kharashka lagu masaafurinayo ama lagu sii haynayo.
2) Sida ku cad faqradda (1) ee Qodobkan, wixii kasoo hara lacagta curaarta ah ee lagu masaafurinayo ama lagu sii haynayo qofka ajnabiga ah, waxaa dib loogu celinayaa isla isaga marka uu dhoofayo ama ka gudbo bar-xuduudeedka dhulka JFS.
3) Haddii qofka ajnabiga ah uusan haysan kharash ku filan oo lagu masaafuriyo, waxaa kharashka masaaafurintiisa ku baxaya bixinaya wakiilka qofka ajnabiga ah ee dalka soo galiyay.
4) Muddada laga mamnuucayo waddanka ajnabiga la masaafuriyey in uu dib ugu soo laabto,kama yaraan karto muddo Lix (6) bilood ah, haddii aysan Maxkamadi xaddidin waqti ka duwan.
5) Masaafurinta ka dhalata dembiyadda la xariira dhinaca socdaalka waxaa fulinaya HSJS, iyadoo la raacayo go'aanka ay gaartay maxkamadda awoodda u leh ama Wasiirka AmnigaGudaha.

## Qodobka 41aad:
## Ka-noqoshada Amarka Masaafurinta

Wasiirka Amniga Gudaha wuxuu awood u leeyahay in uu ka dhaafo amarka masaafurintaee ka dhanka ah qofka ajnabiga ah, -haddii aysan Maxkamadi xukumin musaafirintiisa , si waafaqsan Sharcigan, isagoo sababaynaya.

## CUTUBKA 7aad:
## TODOBAAD: KA SOCDAALIDDA SOOMAALIYA
### Qodobka 42aad:
### Dukumentiyada Safarka

Noocyada baasaboorada iyo dukumentiyada Safarka, sida uu qabo Xeerka Baasaboorka, waxaa kamid ah:

1) Baasaboorka caadiga ah (ordinary passport) ee lagu soo saaro codsiga muwaadin si uu ugu safro;
2) Baasaboorka shaqaalaha (service passport) oo lagu soo saaro codsiga Shaqaalaha Dawladda iyo oggolaanshaha hay'adaha ay khuseyso.
3) Baasaboor diblomaasi ah (diplomacy passport) oo loo soo saaro qof dalka JFS ka haya xil sare Sida:
   a) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Madaxwaynayaashii hore ee JFS;
   b) Xubnaha Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Xaasaskooda & Caruurtooda iyo Dhammaan xildhibaanadii hore;
   c) Ra'isalwasaaraha XFS & Xubnaha Golaha wasiiradda;
   d) Guddoomiyaha Maxkamadda Sare;
   e) Gudoomiyaha Maxkamadda Dastuuriga ah;
   f) Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka;
   g) Garyaqaanka Guud ee Dowladda;
   h) Diplomaasiyiinta Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee dibadda ka howlgala;
   i) Jeneraalada (Sareeyeyasha); Ciidamada Qalabka Sida.
   j) Madaxweyneyaasha iyo Ku-xigeenadooda ee Dowladda Goboleedyada;
   k) Guddoomiyeyaasha Baarlamaanada Dowlad Goboleedyada iyo Ku-xigeenadooda;
   l) Masuulkii kale ee uu garto Madaxweynaha JFS.
4) Dukumentiga safarka oo deg dega ah oo loo soo saaro muwaadin Soomaaliyeed oo aan haysan baasaboor, oo ku safraya kuna soo laabanaya dalka;
5) Dukumentiga Safarka Qaxootiga oo loo soo saaro qaxootiga magan-gelyada ka helay Soomaaliya, si waafaqsan Sharciyada dalka iyo Axdiga Qaxootiga ee Jineefa (Geneva Convention) ee 1951;
6) Warqadda guryo noqoshada (go home) oo loo soo saaro muwaadin aan markaas haysan baasaboor saxan laakiin xaq u leh ayna qasab tahay in uu u soo safro Soomaaliya, iyadoo ay ugu wacan tahay xaalad degdeg ah sida jirro halis ah, tarxiil, geeri ama dib-ugu-laabasho dal; iyo
7) Buugga bad-maaxa oo lagu soo saarayo dalabka Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda.

### Qodobka 43aad:
### Saxnaanshaha Baasaboorada iyo Dukumentiyada Safarka

1) Baasaboorka caadiga ah, midka diblomaasiga iyo kan adeegga ah waxaa loogu safri karaadhammaan dalalka caalamka oo dhan, marka laga reebo dalalka lagu xusay baasaboorka gudihiisa inaan lagu tegi karin.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC HOUSE OF THE PEOPLE GOLAHA SHACABKA

2) Dukumentiga safarka ee deg dega ah wuxuu ansax ahaanayaa muddo cayiman oo ku caddukumentiga oo ah inta lagu gudanayo safarkaas degdega ah ee duruuftu keentay, lagunagaarayo dalka safarka loo yahay.
3) Dukumentiga safarka qaxootiga wuxuu ansax u yahay in loogu safro dhammaan dalalka kale, marka laga reebo dalka asal ahaan uu ka soo jeedo qofka sita, si loo dhawro badbaadadda & bed-qabka qofkaas qaxootiga ah.
4) Warqadda guryo-noqoshada waxaa isticmaalaya muwaadiniinta ay duruufuhu ku haystaan meel ka baxsan JFS marka la hubiyo muwaadinimadooda.

## Qodobka 44aad:
## Safarka Ilmaha Ka Yar (18) Sano

Iyadoo la ilaalinayo bed-qabka Caruurta isla markaana la dhawrayo shuruucda dalka iyokuwa caalamiga ah, ilmaha da'doodu ka yar tahay Sideed & Toban (18) sano, kama safri karaan dalka haddii uusan la socon mid ka mid ah waalidkood ama qof wata dammaanadsharci ah oo la xaqiijiyey in uu safrin karo ilmaha.

## Qodobka 45aad:
## Xadeynta Dadka Ku Safraya Baasaboorada Dawladda

1) Sarkaalka Socdaalku wuxuu u oggolaan karaa dadka uu u oggolaaday Sharciga Baasaboorka in ay ku safraan Baasaboorka Dawladda, marka laga reebo Baasboorka Shaqaalaha Dowladda (Service passport).
2) Sarkaalka Socdaalku isagoo gudanaya waajibaadkiisa wuxuu ka hubinayaa dadka ku safraya baasaboorada Dawladda in ay waafaqsan yihiin nidaamkii loogu talo- galay oo ah:
    a) In qofka ku safraya uu u socdo shaqo-dawladeed oo waafaqsan ujeeddadii lagu bixiyey baasaboorka; ama
    b) In safarkiisu yahay mid ay oggolaatay hay'addiisa, fasax qoraal ahna uu ka haysto.

## Qodobka 46aad:
## Dadka Tarxiilka (Dib-u-soo-celinta) Ku Imaanaya

1) Dadka Tarxiilka (Dib-u-soo-celinta) ku imaanaya waxaa loo oggol yahay in ay ka soo dagi karaan dalka oo dhan.
2) Shirkadaha diyaaradaha iyagoo kaashanaya safaaradda Soomaaliyeed ee ku taal waddanka dadka laga soo tarxiilayo ay joogaan, waxaa lagama-maarmaan ah in ay hubiyaan dadka ay soo qaadayaan in ay yihiin muwaadiniin Soomaali ah.
3) Shirkadaha diyaaradaha iyo noocyada gaadiidka kale inta aysan soo qaadin dadkaas waa in ay u soo gudbiyaan Hay'adda socdaalka warbixin dhammeystiran oo ku saabsan xogtaiyo cadadka dadka ay soo qaadayaan.
4) Shirkaddii u hoggaansami weysa tilmaamaha qodobadda Sharcigan, HSJS iyo Hay'adda Duulista Hawada Soomaaliyeed waxay si wadajir ah uga qaadayaan tallaabo waafaqsan Sharciga dalka u yaal.

## Qodobka 47aad:
## Ka-dhoofidda Dhulka JFS

1) Dhammaan dadka ka dhoofaya dhulka JFS waxay ka safri karaan baraha rasmiga ah ee laga dhoofo, haddii aysan jirin arrin degdeg ah ama sababo lama-filaan ah oo dhaaf siisan awoodda qofka.
2) Shirkaddaha diyaaradaha haddii ay ku xad-gudbaan nidaamka safarka iyo dadka rakaabka ah sida:
   a) Duullimaaadka oo daaha sabab la'aan;
   b) Qof aan ku jirin liiska (manifest) diyaaradda oo raaca ogaal la'aan;
   c) Qof liiska (manifest) ku jiray oo ka hara diyaarada cudur-daar la'aan; iyo
   d) Qof diyaar ah, sida waafaqsan nidaamka oo sabab la'aan la reebay.
3) Dhammaan arrimahaas waxaa ka dhalanaya ciqaab iskugu jirta mag-dhaw, ganaax lacageed ama shaqo-ka-joojin lagu sameeyo diyaaraddaas iyo hawl- wadeennadeeda, kadib marka la xaqiijiyo xil-gudasho-xumada (tort of negligence) ee dhinaca shirkadda diyaaradda ka timid.

## Qodobka 48aad:
## Shuruudaha & Dukumentiyada Loo Baahan yahay Marka La Dhoofayo

1) Muwaadin kasta oo Soomaaliyeed wuxuu xaq u leeyahay in uu ka baxo dalka Soomaaliya marka laga reebo dadka ay mamnuuca ka tahay in ay dalka ka baxaan iyadoo ku saleysango'aan ama amar maxkamadeed.
2) Muwaadiniinta Soomaaliyeed way ka bixi karaan dalka Soomaaliya, haddii ay wataan baasaboor iyo dal-ku-gal sax ah oo ay ku gelayaan dalka ay u socdaan.
3) Baasaboor boggagiisu ay wada buuxaan laguma safri karo, lagumana soo geli karo bar- xudduudeedyada dhulka JFS.
4) Baasaboor waqtiga dhiciddiisa ay ka harsan tahay lix (6) bilood ama ka yar, laguma safrikaro, lagumana soo gali karo dalka JFS, marka laga reebo baasaboor loogu noqonayo dalkii laga soo saaray.
5) Shaqaalaha Dawladda waxay ku safri karaan Baasaboorka Shaqada (Service Passport), waxayna xaq u leeyihiin in ay haystaan inta ay shaqaale Dawladdeed yihiin.
6) Saraakiisha Sare, Dibolomaasiyiinta iyo Siyaasiyiinta Dawladda ee Goleyaasha kala duwan waxay ku safri karaan Baasaboorka Diblomaasiga ah.

## CUTUBKA 8aad:
## ILAALINTA, WAAJIBAADKA IYO XUQUUQDA QAXOOTIGA
## Qodobka 49aad:
## Shuruudaha Qaxootinimada

Qof kasta oo bani'aadan ah wuxuu xaq u leeyahay in qaxootinimo loo aqoonsado sida uu qabo Heshiiska Geneva ee 1951 , si loo badbaadiyo noloshiisa iyo bed-qabkiisa, marka la hubsado arrimaha soo socda:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC HOUSE OF THE PEOPLE GOLAHA SHACABKA

1) In ay jirto cabsi dhab ah oo waxyeello salka ku haysa sida, cadaadis midab, jinsiyad, diin, isir, fikrad siyaasadeed ama ka tirsanaan kooxo bulsho oo gaar ah, iyadoo qofkuuu dalkiisa ka cararay ama dibedda ka joogo, isla markaana cabsidaas darteed uusan dib ugu laaban karin si uu ugu nabad-galo dalkiisa; ama
2) In uu jiro weerar dibedda ah, duulaan, la-wareegid shisheeye ama dhacdooyin si xooggan u saameynaya nidaamka guud ee qeyb ama guud ahaan dalka uu qofku ka soo jeedo ama u dhashay oo dhan ama lagu qasbay in ay ka cararaan meeshii ay caadi ahaan u deganaayeen si ay magan-gelyo uga doontaan dal kale oo ka baxsan kii asalka u ahaa ama ay u dhasheen.

**Qodobka 50aad:**
**Codsiga Magan-gelyo doonka**

1) Qofka dalbanaya in loo aqoonsado Qaxootinimada waa in uu:
   a) Ku sugan yahay gudaha dhulka JFS; ama
   b) Si dhaqso ah u wargeliyaa Hay'adda arrintaasi u xilsaaran ama Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha, ama Xafiiska Socdaalka ee ugu dhow.
2) Hay'addu waxay sameynaysaa diiwaangelinta kowaad ee dadka qaxootiga ah iyo kuwa magan-galyo doonka ah, marka ay yimaadaan dhulka JFS, iyadoo siineysa oggolaansho deegaan ku-meel-gaar ah, sidoo kalena xogtooda la wadaageysa Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakayaasha iyo hay'adaha u xil-saaran amniga dalka.
3) Guddiga Qaranka ee go'aan-ka-gaarista Qaxootiga ayaa qiimeyn ku sameynaya codsiga qaxootinimada, go'aanna ka gaaraya.
4) Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha waxay qofka qaxootinimada dalbaday siinaysaa Aqoonsi sheegaya qaxootinimada codsadaha, marka ay hesho go'aanka Guddiga Go'aan-ka-gaarista Qaxootiga.

**Qodobka 51aad:**
**Bixinta ama Diidmada Codsiga Qaxootinimada**

1) Dawladda Soomaaliya waxay u madax-bannaan tahay in ay siiso ama u diido qofka dalbaday magan-gelyo ama qaxootinimo, si waafaqsan Sharciyada dalka iyo Axdiga Jineefa 1951.
2) Faqradda (1) ee qodobkan ma saameynayso dadka magan-gelyo doonka ah ee xoriyadooda iyo naftooda ay khatar ku gelayso dalkii ay ka soo jeedeen ama ka yimaadeen.
3) Hay'adda Qaxootiga Qaranku waxay ku oggolaanaysaa ama ku diidaysaa magan-galyo- doonka go'aanka uu gaaro Guddiga Qaran ee Go'aan-ka-gaarista Qaxootiga si waafaqsan Sharcigan.

**Qodobka 52aad:**
**Xubnaha iyo Shaqada Gudigga Go'aan-ka-gaarista Qaxootiga**

1) Guddiga Go'aan-ka-gaarista Qaxootiga wuxuu ka kooban yahay Sagaalka (9) xubnood ee soo socda:

a) Guddoomiyaha Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha;
b) Wakiil ka socda Wasaaradda Amniga Gudaha;
c) Wakiil ka socda Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda JFS;
d) Wakiil ka socda Wasaaradda Arrimaha Gudaha Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta;
e) Wakiil ka socda Wasaaradda Arrimaha Dibedda;
f) Wakiil ka socda Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda;
g) Wakiil ka socda Taliska Ciidanka Booliska Federaalka;
h) Wakiil ka socda Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha iyo
i) Wakiil ka socdo Wasaaradda Caddaaladda.

2) Guddigani wuxuu wada shaqeyn dhow la yeelanayaa Hay'adda Qaramadda Midoobay uqaabilsan Qaxootiga si ay u xaqiijiyaan gudashada waajibaadkooda.
3) Shaqada Guddiga Qiimeynta Qaxootinimada waa qiimeynta iyo go'aan-ka- gaarista codsiyada qaxootinimada sida ku cad sharcigan iyo "Sharciga Qaxootiga Soomaaliya".
4) Sida ku cad Faqradda (1) (b) ee Qodobkan, Guddiga waxaa guddoominaya GuddoomiyahaHay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha, waxayna shaqada Guddigu tahay:
   a) Oggolaanshaha iyo bixinta magan-gelyada Qaxootinimo; ama
   b) Diidmada magan-gelyada Qaxootinimada; iyo
   c) La socodka guud ahaan duruufaha dadka Qaxootiga ah.

## CUTUBKA 9aad:
## CIQAABTA SAARAN DADKA KU XAD-GUDBA SHARCIGA
### Qodobka 53aad:
### Gefafka Guud

1) Qofkii bulsho weynta ka mid ah oo geysta mid ka mid ah gefafka soo socda, waxaa arrintiisa loo gudbinayaa Maxkamadda awoodda u leh oo go'aan ka gaareysa, sida haddiiuu:
   a) Si ula-kac ah ugu caawiyo qof kale in uu dalka u soo galo ama uga baxo si xad-gudubku ah sharcigan;
   b) Sameeyo gudbid ama isku-day gudbid bar soo-gelis-xudduudeed, iyadoo aan fasaxlaga haysan sarkaalka socdaalka;
   c) Qof kale si ula-kac ah u siiyo kaalmo ama u oggolaado qof kasta oo soo gelaya ama ka baxaya dhulka Soomaaliya, isagoo ku xad-gudbaya Qodobbada Sharcigan;
   d) Si ula-kac u diido in uu wargeliyo sarkaalka socdaalka kadib markii sidaas laga codsaday;
   e) Qofka sheegta in uu leeyahay baasaboor ama dukumenti safar ee qof kale;
   f) Oggolaado in baasaboorkiisa ama dukumentigiisa safarka loo isticmaalo ujeeddo sharci-darro ah;
   g) Ku sifoobo haysashada wax ka badan hal baasaboor ama dukumenti safar oo xogtiisa kala duwantahay;
   h) Ku guul-dareysto in uu ka jawaabo su'aal maan-gal ah oo uu weydiiyey sarkaal socdaalama bixinta macluumaad been ah;

i) Soomaaliya ku soo laabto iyadoo amarkii hore ee lagu masaafuriyey uu weli dhaqan-gal yahay; ama
j) Ku xad-gudbo ama ku guul-dareysto in uu u hoggaansamo shuruudaha uu Tilmaamayo Sharcigani.

2) Qofka siiya qof ajnabi ah shaqo, isagoo aan haysan oggolaanshaha uu Sharcigani tilmaamayo wuxuu muteysanayaa in laga qaado tallaabada sharci ee ku xusan Faqradda ee Qodobkan.

## Qodobka 54aad:
## Gefaf iyo Ganaaxyo Cayiman

1) Qof kasta oo been-abuura dukumenti dawladeed, sida baasaboorka, dal-ku-galka, qoraallada kale ee rasmiga ah ama Sarkaalka ogolaada isagoo aan fasax u qabin waxaa arrintiisa loogudbinayaa Maxkamadda awoodda u leh oo go'aan ka gaareysa.
2) Qof kasta oo gacan ka geysta ama lagu helo in uu gacan ka geystay tahriibin dad, isagoo isticmaalaya wadiiqooyin sharci-darro ah, waxaa arrintiisa loo gudbinayaa Maxkamadda awoodda u leh oo go'aan ka gaareysa.
3) Qof walba oo ku lug yeesha safrinta dadka si jinsi ahaan looga ganacsado, ama ku lug yeesha ku-shaqeysi iyo xad-gudub carruur, waxaa arrintiisa loo gudbinayaa Maxkamadda awoodda u leh oo go'aan ka gaareysa.
4) Qofka ajnabiga ah ee dalka jooga maalmo ka badan muddadii ku xusnayd oggolaanshaha hore loo siiyey, waxaa maalintii ku soconeysa ganaax lacageed oo gaaraya Shillin Soomaali u dhigma Toban Doollarka Maraykanka ah (US$10) maalintiiba.

## Qodobka 55aad:
## Dhaqan-galinta Sharcigan

1) Fulinta Sharcigan iyo dhaqan-gelintiisa waxaa u xil-saaran dhammaan hay'adaha fulinta heer federaal iyo heer Dawlad-goboleed ee ku shaqada leh hawlaha uu xeerinayo Sharcigani.
2) Dhaqan-gelinta Sharcigan waxaa mas'uuliyad gaar ahi ka saaran tahay Hay'adda Socdaalka & Jinsiyadda Soomaaliyeed (HSJS) iyo dhammaan laamaha kale ee dawladda ee ay wada-shaqeynta la leedahay hay'addu.

## Qodobka 56aad:
## Xeer-nidaamiyeyaal iyo Hab-raaaacyo

1) Wasaaradda Amniga Gudaha waxay soo saaraysaa xeer-nidaamiyeyaal faahfaahinaya sida ugu habboon ee loo hirgelin karo Sharcigan, kadib marka ay soo diyaariso Hay'addu.
2) Agaasimaha Guud ee Hay'adda wuxuu soo saari karaa tilmaamo iyo hab-raacyo lagu meel-marinayo Qodobbada sharcigan iyo hannaanka shaqo ee HSJS.

**Qodobka 57aad:**
**Baabi'in**

Sharcigan wuxuu burinayaa oo meesha ka saarayaa sharci kasta oo ka hor-imaanaya amaaan la socon karin Sharcigan ee oo ku saabsan arrimaha socdaalka dhulka JFS oo uu ku jira Sharci Lr. 9 ee 27 Juun 1966 iyo hab-raacyadii ama siyaasadhihii ka farcamayey

**Qodobka 58aad:**
**Dhaqan-gal**

Sharcigani wuxuu dhaqangalayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA
THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC
HOUSE OF THE PEOPLE
GOLAHA SHACABKA